

## Su'aalaha iyo Jawaabaha Dib-u-Furista (Reopening Q&A)

- Degmadu wali miyey ka kahadleysaa ku soo celinta 50 ilaa 100 ardey oo baahi weyn qabta Dugsi kasta Bisha Febraayo 1? [Haa.](#)
- Yaa loo arkaa inuu qabo baahi sare? Sideey ardaydaas ku doorteen maamulayaashu? [Tirada ardayda baahida sare qaba waxaa lagu doortey inay ku noqdaan dugsiyada si shaqsi ahaan, waxaa aqoonsanaya maamulayaasha iyadoo lagu saleynayo xogta \(data\), talo soo jeedinta macallinka, iyo doorbidka waalidka.](#)
- Qoysaskaas miyaa horay loola xiriiray? [Haa. Nidaamkani wuu socday.](#)
- Wax fikrad ah maka heysaa tiro intee la'eg ayaan ka hadlaynaa ardada Baahida Sare ee ku baahsan degmada oo dhan? Miyay aadi doonaan dugsi shan maalmood usbuucii?
- [Ardaydani waxay ku jiraan qorshayaasha dugsi ku yaalla websaydhkeena - 50 illaa 100 oo ay ka mid yihiin dadka aan hore u soo sheegnay ee soo noqonaya Febraayo 1. Ilaa iyo hada waxay ka qaybgalayaan dugsi 5 maalmood.](#)
- Dhammaan ardayda fasalka Pre-Ka ilaa fasalka 2aad, dib miyaa loogu casuumi doona ku noqoshada inta lagu jiro wajiga koowaad? [Haa.](#)
- Dhammaan Ardayda fasalka 12aad ma lagu casuumi doona Febraayo 1? [Haa.](#)
- Maxaa loo doortey labadaas kooxood inay marka hore soo noqdaan?
- [Kuwa fasalka 12aad \(seniors\), waxa xaqiiqda ku saleysan inay seegeen dhamaadka sanadkii hore 11aad \(junior\) oo ay ubaahanyihiin inay udiyaar garoobaan qalin jabinta iyo kuliyaada sanadkan.](#)
- [Ardayda Pre-K ilaa 2aad markii lagu saleyeeyo cilmi baaris, waxay muujineysa sanadaha hore inay isbeddel ku sameeyaan dhowr meelood oo muhiim u ah horumarka, aqoon ahaan iyo bulsho ahaanba / shucuur ahaanba.](#)
- Ardaydaasi miyay noqon doonaan qaab isku dhafan (hybrid format)? Ma ogtahay waxa taasi u ekaan doonto weli? [Fasalada Pre-K – 2aad, waxay ku jiri doonaan jadwal laba maalmood ah oo lagu bilaabi doono. Kooxda A, waa Isniinta / Talaadada. Kooxda B, Khamiista / Jimcaha. Arbacada; labadaba waxbarashada aydayda wakhtigooda u madax banana yihiin hawlaha fasalka 'asynchronous' / barashada fog \(remote\).](#)
- Goorma ayaa lala xiriiri doona ardaydaas iyo waalidiintaas si loo ogaado haddii ay doonayaan inay soo noqdaan? [Waa qaab socda, oo si isdaba joog ah u socon doona inta soo noqoshada ardaydu ay dhacayso.](#)
- Wejiyada soo noqoshada xiga waxaa u dhaxeyn doona hal illaa laba toddobaad, inta u dhexeysa illaa bartamaha Bisha Maarso, maa sax baa?
- [Waxay ku xiran tahay sayniska, imtixaanka, iyo waxa aan ka baranno Wajiga 1aad.](#)
- Wejiyadaas soo noqoshada, ma waxaa lagu saleyn doona heerka fasalka?
- [Waxay u egtahay in lagu sameyn doono heer fasal, iyadoo fikradaha laga helayo Kooxaha Iskuulka Ku Saleysan \(SBTs\).](#)
- Ujeedadu ma tahay in lala xiriiro waalid kasta ee degmada bisha Janaayo si loo go'aamiyo haddii ay doonayaan in ilmahoodu soo laabtaan iyo in kale? [Haa. Iyadoo Loo Marayo SBTs.](#)
- Ka warran imtixaanka? Ma bilowdey hawshaas helitaanka imtixaanada iyo helitaanka ogolaanshaha waalidka? [Tani waxay ku socotaa iyada oo loo marayo tilmaamaha iyo isku-dubbaridka Xubnaheena Golaha La-Talinta Caafimaadka \(HAC\) oo ay ku jiraan Agaasimaheena Caafimaadka Dr. Dennis Kuo Dr. iyo Dr. Tonja Williams.](#)